UNITED NATIONS NATIONS UNIES

Office for the Coordination of Humanitarian Affairs – Somalia

Warbixinta Xaaladda # 43 – 31 October, 2008

Is-beddellada ugu muhiimsan

29kii October, gaardhi si xoog ah ku galay xarunta UNDP Hargeysa, Somaliland, ayaa si naxdin leh ku dilay xubno ka mid ahaa shaqaalaha Qaramada Midobay iyadoo qaraxaasina uu khasasre lixaad leh u gaystay dhismaha. War-saxaafadeed uu 30kii Oktoober soo saaray isku-duwaha QM ee hawlaha bini'aadminnimada (RC/HC) ee Soomaaliya, Mark Bowden, ayaa waxa uu tacsi ugu diray qoysaskii iyo asaxaabtii ay ka geeriyoodeen labada xubnood ee u shaqaynayey waaxda ammaanka iyo nabadgalyada iyo xafiiska mashruuca adeegyada QM. Labadaas shaqaale waxay ifka kaga tageen xaasas iyo caruur. Waxaa kaloo weerarkaas ku dhaawcmay lix qof oo kale oo shaqaalaha QM ka mid ahaa, kuwaasoo labo ka mid ah dhaawacyadoodu ay aad u liiteen loona qaaday dalka Djabouti si gurmad caafimaad oo dheeraad ah loogu sameeyo. Tani waxay ku soo beegantay in ka yar labo toddobaad markii dilal qorsheysan loo gaystay shaqaale ka tirsan QM. Ilaa Bishii January, waxaa QM Somaaliya looga dilay ilaa siddeed xubnood oo shaqalaheeda ka mid ahaa.

25kii Octoober, waxaa magaalada Guri-ceel oo gobolka galgaduud ka tirsan lagu toogtay haweeney u shaqayn jirtaya hay'adda an dawliga ahyn ee IIDA , iyadoo markaas goobtii shaqada ka soo laabanaysay. Sababta dilkaas ilaa imminka lama garanayo. Ilaa bishii January, wadar gaaraysa 24 qof oo ka mid ah shaqaalaha hay'adaha aan dawliga ahayn ee dhinaca gargaarka ayaa lagu dilay Soomaaliya,.

Dhambaal loo soo gudbiyey dadweynaha soomaaliyeed oo ku beegnaa maalinta xuska QM ee 24kii Oktoober, aya Isku-duwaha hawlhaha gargaarka bini'aadminnimada ee dalka Soomaaliya, wuxuu shaaca kaga qaaday in xaaladda ammaanka ee Soomaliya ay sii xumaanayso, islamarkaana QM ay sida ugu macquulsan oo dib-u-habayn ku dhisan u diyaargrowday sidii ay u xaqiijin laheyd howlgalada daryeelka baahida asaasiga ee qeybaha bulshada tabalaysan. Wuxuuna ugu baaqay ummadda Soomaaliyeed inay si wadajir ah ula shaqeyaan ha'adaha QM iyo la-hawlgalayaashoosdaba, si ay u taabagasho waxqabadkooda la xidhiidha sidiii xal wara loogu radin laha masaahkilka dhinaca ammanka iyo sii xoojinta hawlgallada bini'aadminnimada iyo hawlaha dhinaca horumarinta.

22kii October, Ku-xigenka hay'adda xuquuqul-insaanka ee QM, Ms Kyung-wha Kang, waxaa uu boqday Xeryaha qaxootiga Dadaab ee waqooyi-Bari kenya halkaas oo ay ku nool yihiin; boqolkiiba 97% qoxooti Soomali ah. Ilaa bilowgii bishii January, tiro gaareysa 4,500 Somaali ah ayaa ka soo gudabtay xadka Soomaliya sida ay xustay heyadda UNHCR iyadoo qaar kalana ay sii wateen safarkooda ilaa dalalka Libya, Koofurta afrika iyo waddamo kale. Ms. Kang waxay tidhi, “waa in xal kasta oo nabadeed oo laga gaadho dalka Soomaliya uu ku salaysnadaa caddaalad la iska-dhex-arki-karo, si looga guulaysto xad-gudubyada ka dhanka ah arrimaha xuquuqul-insaanka ah ayna gaysanayan dhammaan dhinacyada iskaga soo horjeeda dagaalka dalka ka jira.”

21kii Oktoober ka dib markii uu madaxweynaha Somaliland uu soo saaray wareegto taasoo lagu mamusayey Munaasabadduii Ciidul-Fitriga laga sii daayey xabsiyada Somaliland tiro 104 caruur ah oo da’doodu u dhaxeyso 15 – 18 jir. Talaabadas ayaa ku soo beegantay kaddib markii la dhaqan-geliyey sharciga cusub ee garsoorka carruurta ee Somaliland ee April 2008. War-saxaafaded wadajir ah oo ay 24kii Oktoober soo wada saareen hay'adaha UNDP iyo UNICEF, ayaa lagu sheegay in inta badan carruurtaas xabsiga loo dhigay arrimo la xiriira anshax xumo isla markaana ku madax adkaadeen waaliddiintoodii. Markii xabsiga laga soo daayey carruurtaas, waxaa loo diyaariyey adeegyo dhaqan-celin ah oo ay ka mid yihiin; gunno cunto iyo gaadiid dib ugu celinaya goobihii ay bulshadoodu ku dhaq-

naayeen.

26kii October, waxa si nabadgalyo ah ku gaadhay magalada muqdishu labo markab oo u rarnaa hay'adda WFP oo siday raashin gargaar ah oo gaarayey ilaa 18,500 metric tons kana so gooshay magalada Mombasa iyadoo ay galbinayen maraakiibta ciidanka badda ee dalka Netherlands (Holland) . Waxayna maraakiibta reer Holland hawlgalka kala wareegeen dalka Canada oo iyagana hawlgalkoodu ku ekaa 22kii October.

Gurmadka

inkastoo ay caqabado la xidhiidha fursadaha dhaqdhaqaaqa iyo xaalada ammaanku ay weli ka jiraan Soomaaliya, haddana, waxay hay'adda WFP meel marisay dhowr hawlgallo oo raashin qaybin ah oo ay isla toddobaadkan fulisay. Gobolka Bakool, waxay hay'addu ka qaybisay raashin gaarayey ilaa 3,867 metric tons oo loo qaybiyey ilaa 290,963 qof. . Halka magaalada Bossaso, Puntland, ay raashin gargaar ah gaarsiisay i45,132 qof oo ka mid ah dadka soo bara-kacay iyo ilaa 50,000 oo ka mid ah dadka saboolka ah ee magaalooyinka ku dhaqan ee aan awoodin sicirka raashinka suuqa oo ay sababeen sicir-bararka ira. Sidoo kale magaalada Marka ee gobolka Shabeelaha hoose, ilaa 119,961 qof ayaa la gaadhsiiyey raashin dhan 1,647 metric tons, iyadoo ay weli socdaan hawlgallada raashin qaybinta goobaha dadka soo bara-kacay ee waddada Afgoye.

Fahfaahin dheeraad Afka Ingriiska kala Xidhiidh: Rita Maingi tel **+254 734 800 120 –** maingir@un.org,

Af-Somaaligana kala xidhiidh: Mona Mohamed tel + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org

Cinwaanka Shabakadda: http://ochaonline.un.org/somalia